



## Sunta Rinjiga Ka Dhalata Iyo Xuquuqda Kireystaha

Lead Paint and Tenants' Rights

### Waxyaabaha waajibka ku ah in kireeyuhu iiga sheego sunta jirka ka dhalata?

Guryaha la dhisay wixii ka horeeyey 1978kii, waxaa waajib ku ah in kireeyuhu ku siiyo waraaq ku saabsan sunta ka dhalata rinjiga oo ku wargeliyo wax kasta oo ay ka ogsoon yihiin khatarta suntaas ee guriga.

Haddii uu kireeyuhu jabiyo sharcigan, dawladda ayaa ku ganaaxeysa. Haddii sharciga uu jabiyeey mulkiilaha ay sabab u noqoto in aad gasho kharash, waxa aad mulkiilaha ku dacweyn karaa 3 laab kharshka kaa baxay iyo lacagta qareenka. Tusaale ahaan: Inaad ka helin ogaysiiska mulkiilaha guriga ayna khasab noqotay inaad guurto ladhka agwii. Waxa dhici karta inaad ku sheegato mulkiilaha 3 jibaar cadadka kharashkaaga guurida.

### Maxaan yeelayaa haddii aan arko rinji ka soo fuqaya ama daadanaya?

Haddii aad ku aragto rinjiga soo daadanaya ama fuqaya guri la dhisay wixii ka horeeyey 1978kii, markiiba la xiriir kireeyaha. Kireeyuhu waa inuu u diraa baaritaanka sheybaarka. Waaxda caafimaadka qaarkood lacag la'aan ayey ku sameeyaan baaritaanka. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa shirkadaha sameeya baaritaanka. Qiimaha ku baxaya waa \$25 - \$35. Waxa ay sidoo kale ka baari karaan sunta rinjiga ka dhalata biyaha. Waxa kale oo aad dukaamada ka soo iibsan kartaa qalabka "aad adigu ku baari kato."



Haddii sheybaarka lagu ogaado sunta rinjiga ka dhalata, kireeyaha ayaa laga doonayaa inuu hagaajiyo rinjiga soo fuqaya ama daadanaya si amaan ah. Dhamaan caruurta da'doodu ka yar tahay 6 sano oo guriga ku nool ama booqda waa in laga baaraa sunta rinjiga ka dhalata.

Haween kasta oo uur leh oo ku nool ama soo booqda guriga waa in laga baaraa sidoo kale.

Tusaale ahaan: Inaad ka helin ogaysiiska mulkiilaha guriga ayna khasab noqotay inaad guurto ladhka agwii. Waxa dhici karta inaad ku sheegato mulkiilaha 3 jibaar cadadka kharashkaaga guurida.

<https://www.health.state.mn.us/communities/environment/lead/prof/leadhazgrants.html>

<https://www.hennepin.us/residents/property/lead-paint-hazards>

[https://www.minneapolismn.gov/resident-services/property-housing/healthy-homes/renovation-grants/.](https://www.minneapolismn.gov/resident-services/property-housing/healthy-homes/renovation-grants/)

## Sidee ayaa dayactirka si amaan ah loogu sameyn karaa?

Weydiiso in kireeyuhu shaqada u qorto shaqaale ogolaasho u heysta hagaajinta rinjiga soo fuqa ama daata. Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Minnesota waxa ay hayaan liiska shirkadaha hagaajiya. Soo wac (651) 201-4620 ama e-mail u soo dir [health.asbestos-lead@state.mn.us](mailto:health.asbestos-lead@state.mn.us).

Macluumaad dheeraad ah soo booqo: [www.health.state.mn.us/communities/environment/lead/](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/lead/).


Adiga ha isku dayin hana ogolaan in qof aan aqoon u laheyn uu xaliyo arrintan. Haddii aan si sax ah loo sameyn, waxa ay keeni kartaa sun dheeraad ah ama dhibaato dheeraad ah oo soo gaarta caruurta.

Qoyskaagu ma aha inay guriga joogaan kolka ay hawsha hagaajinta ah la qabanayo. Goobta laga shaqeynayo waa in la xiraa oo busta ka soo baxda laga ilaaliyaa in aysan gaarin dharka iyo alaabada. Guriga dib ha ugu noqon ilaa aad hubiso in si haboon loo nadiifiyey. Busta agagaarka goobaha laga shaqeeyo waa in lagu sameeyaa baaritaan si loo xaqiijiyo in aan suntu ku harin.

Habab kala duwan oo dayactir ah ayaa la adeegsadaa taasoo ay ugu wacan tahay sunta oo kala duwan. Waaxda caafimaadka ayaa kuu sheegi kara hababka ugu amaansan.

Tusaale ahaan dayactirka waxaa ka mid noqon kara:

- Daaqadaha laga helo sunta rinjiga ka dhalata oo la fujiyo.
- Rinjiga duqooba oo laga fujiyo
- Goobaha sunta laga helay oo la daboolo
- Maro qoyan lagu nadiifiyo
- In la isticmaalo makiinad dhulka lagu xaaqo oo gaar ah "HEPA"



Haddii aad degan guri lagaaga bixiyo lacagta dawladda dhexe, waxaa jira sharciyo dheeraad ah oo ku saabsan sida loo dayactiro ama nadiifinta loo sameynayo. Sharciyadaas waxa ay khuseeyaan guryaha dadweynaha, Section 8, guryaha kirada lagu kabo, iyo barnaamijyada kale. La xiriir xafiiskaaga gargaarka sharciyada ee 1(877) 696-6529 haddii guriga aad degan tahay lagaaga bixiyo lacag ka timaadda dawladda dhexe.

## Maxaan yeelayaa haddii ilmahayga lagu arko sunta jirkooda ku jirta oo aad u sareysa?

Waaxda Caafimaadka ayaa baaritaan ku sameyneysa gurigaaga haddii heerka sunta dhiigga ku jirta ee ilmahaaga ay aad u sareyso (5 mcg/dL). Haddii sunta laga helo gurigaaga, kireeyaha guriga waxaa la siinayaa muddo go'an oo ku dayactiro guriga. Haddii aanu mudadaas ku dhameystirin kireeyaha, waxaa talaabo sharci ah ka qaadaya Waaxda Caafimaadka. Waxaa laga yaabaa in guriga loo aqoonsado mid aan amaan aheyn oo lagu faro in aad ka guurto.

Akhri xogta urursan ee [Ka Badbaadi Caruurtaada Sunta Ka Dhalata Rinjiga](#).

## Maxaan yeelayaa haddii ay noqoto in aan guriga ka guuro?

Haddii aad guriga ka guurto habeen ama dhawr maalmood inta ay nadiiinta iyo dayactirku socdo, weydiiso in kireeyuhu bixiyo kharashka, sida hoteelka aad degto, kharashka cuntada ee dheeraadka ah, iyo kan gaadiidka. **Heyso dhamaan cadeynta lacag bixinta!**

Waxaa jira hay'ado dhawr ah oo amri kara in sunta laga hagaajiyo guriga marka uureyda ama caruurta sunta laga helo jirkooda. Haddii ay hay'addu tiraahdo waa in aad guriga ka guurtaan mudada hawshu socoto, **ma ah** in aad bixiso lacagta kirada mudada aad ka maqan tahay gurigaaga.

Haddii aadan dooneyn in aad halkaas sii degenaato dhibaatada sunta darteed, waad burin kartaa heshiiska kirada, ka guuri kartaa mana aha in aad bixiso kiro dheeraad ah. Haddii aad buriso heshiiska kirada, kireeyaha waa in uu muddo 5 cisho gudahood ah kugu soo celiyaa lacagtii keydka kirada ee aad horey u bixisay (deposit). Waa in ay raacaan sharciyada u degsan lacagta

keydka kirada. Akhri xogta urursan ee [Lacagta Keydka Ee Kirada](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharciyadan.

Waa in aad la tashataa qareen si uu kuu siiyo talada kugu haboon **ka hor** inta aadan joojin bixinta kirada ama aadan burin heshiiska kirada. Qareenka ayaa kaa caawinaya in sharciyada arrintaan khuseeya ee hay'adda amraysa in shaqo laga qabto sunta.

## Maxaan yeelayaa haddii aanu kireeyuhu waxba ka qaban sunta ka dhalata rinjiga?

Haddii aanu kireeyuhu waxa ka qabaneyn sunta ka dhalata rinjiga, waxa aad waraaq u qori kartaa waraaq aad kireeyaha kaga codsaneyso in muddo 14 cisho ah wax kaga qabto sunta. Diiwaangeli in kirada aad Xisaabta Keyd ah ku shubto inta hawsha laga qabanayo. Akhri xogta urursan ee [Ka Helida Qolada Gurigu Inay Hagaajiiso Wixii Halaysan](#). Xaaladaha qaarkood, waxa aad maxkamadda ka diiwaan gelin kartaa Talaabada Degdegga Ah ee dayactirka Kireystaha (ETRA). Akhri xogta urursanee ee [Dhibaatooyinka Dayactirka ee Degdegga Ah](#).

Haddii qof qoyska ka tirsan laga helo sunta jirka ku jirta oo aad u sareysa, tixgeli in aad qabsato qareen oo in magadhaw lagaa siiyo kuu raadiya **ka hor** inta aadan talaabo xagga sharciga ah qaadin Xisaabta Keydka Kirada ama ETRA waxaa laga yaabaa in ay saameyn dadban ku yeelato dacwad in magdahw lagaa siiyo ah pp aad mar dambe ddiwaan geliso.

## Maxaan weydiisan karaa in maxkamaddu amarto?

Haddii aad maxkamadda ka furto Xisaabta Keyka ee Kirada ama ETRA, waxa aad maxkamadda ka codsan kartaa dhawr waxyaabood oo kala duwan sida:

- In kireeyaha la amro inuu dayactiro isaga oo adeegsanaya hababka dayactirka ee amaanka ah.
- In lagu amro in aad kirada geyso maxkamadda ilaa kireeyuhu dayactiro guriga.
- In kireeyaha la amro inuu bixiyo hoteelka aad degto, kharashka dheeraadka ah ee cuntada, ama uu ku dajiyo guri kale inta uu dayactirku socdo.
- In kirada yareeyo bil kasta oo aad degan tahay guriga inta aan la dayactirin.
- In aad ka baxdo heshiiska kirada xilli hore.



## **Maxaan yeelayaa haddii la ii keeno ogeysiiska in aan guriga lagu noolaan karin?**

La soo xiriir xafiiska degaankaaga ee gargaarka sharciyada si ay kuu caawiyaan. Waxa aad maxkamadda ka diiwaan gelin kartaa ETRA. Akhri xogta urursanee ee [Dhibaatooyinka Dayactirka ee Deqdeqga Ah](#). Waxa ay maxkamaddu amri kartaa kireeyaha in uu markiiba dayactirka sameeyo oo uu joojiyo in guriga laga dhigo mid aan lagu noolaan karin. Waxa kale oo maxkamaddu amri kartaa kireeyaha inuu ku dajiyo guri kale ama bixiyo kharashka hoteelka, cuntada dheeraad ah, iyo kharashka isu socodka inta laga hagaajinayo guriga ama aad guri ka heleyso. Haddi ay dhacdo in aad guurto, waxa aad maxkamadda weydiisataa in ay amarto kireeyaha inuu bixiyo dhamaan kharashka guuritaanka oo lagu ganaaxo 3 laab kharashka aad gasho.

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.